




# WADDADA OVERLOOK WALK: ISKU-XIRNAANSHO CUSUB OO LOOGU TALAGALAY MAGAALADA

Xafiiska Magaalada Seattle ee Mashaariicda Biyo-xigeenka (Waterfront) iyo kuwa Madaniga ah ayaa beddelaya biyo-xigeenka dhexe ee Seattle wuxuunna dib isugu xiriirinaaya magaalada iyo gacan-biyoodka Elliott Bay. **Waddada Overlook Walk**, oo ku taalla inta u dhaxeysa meesha kalluunka iyo xayawaan-badeedka lagu xannaaneeyo (Seattle Aquarium) iyo Suuqa Pike Place, waa qayb muhiim ah oo ka mid ah isku-xirnaanshaha waxayna noqon doontaa bar udub-dhexaad u ah biyo-xigeenka cusub.

## GUUDMARKA MASHRUUCA

Waddada Overlook Walk ayaa abuurii doonta dhabbe sare loo yara qaaday oo isku-xiriirinaaya Suuqa Pike Place iyo biyo-xigeenka, waxayna suuragalinaysaa gaarid iyada oo aan marnaba laga tallaabin waddada cusub ee Alaskan Way. Mashruuca ayaa sidoo kale bixin doonna muuqaallada/aragtiyada ballaaran ee gacan-biyoodka Elliott Bay, abuurii doonna goobo lagu ciyaaro oo aan rasmi ahayn iyo fagaarayaal dadweyne oo cusub iyo dhul-qurxin.



## MASHAARIICDA LA-HAWLGALAHA

### SUUQA PIKE PLACE: MARKETFRONT

"MarketFront" cusub, ee la dhammeeyay 2017, ayaa si toos ah isugu xiraya waddada Overlook Walk ee cusub iyo Meesha Kalluunka iyo Xayawaan-badeedka Lagu Xannaaneeyo ee Aquarium's Ocean Pavilion.

#### Macluumaad dheeraad ah

<http://pikeplacemarket.org/marketfront>

### MEESHA KALLUUNKA IYO XAYAWAAN-BADEEDKA LAGU XANNAANEYO EE SEATTLE: OCEAN PAVILION

Ocean Pavilion-ka cusub ee Meesha Kalluunka iyo Xayawaan-badeedka Lagu Xannaaneeyo ee Seattle ayaa noqon doonta Seattle Aquarium-ka jira ee ku yaalla Dekedyarayaasha (Piers) 59 iyo 60 oo la ballaariyay. Waxay bixin doontaa dhowr qaybo dadweyne oo muhiim ah sida jaran-jarro cusub iyo wiish isku-xiraya biyo-xigeenka iyo Suuqa Pike Place.

#### Macluumaad dheeraad ah

<http://www.seattleaquarium.org/planning>

Waddada Overlook Walk ayaa Suuqa Pike Place ku xiraysa waddada biyaha xigta ee beerta biyo-xigeenka (Waterfront). Nakh-shadda kama-dambeysta ah ayaa soo hagaagaysa mashruuca kama-dambeysta ahna wuxuu u muuqan karaa mid xoogaa ka duwan.



**Seattle**  
Office of the Waterfront  
and Civic Projects

## QAYBAHA MUHIIMKA AH

Waddada Overlook Walk ayaa la nakh-shadeeyay iyada oo loo yeelay dhowr qaybood oo muhiim ah, oo ay ku jiraan Jaran-jarooyinka Salish, Barta Laga Daawado Gacan-biyoodka (Bay Overlook), makhaayad kafee iyo goob tafaariiqda lagu iibiyo iyo goob lagu ciyaaro oo loogu talagalay qoysaska kuna taalla meesha bannaan ee Bluff Walk. Qaybaha ayaa waxaa ka mid ah macnaha dhaqanka iyo midka dabiiciga ah ee goobta, oo ay ku jiraan muuqaalka farshaxan asali ah iyo adeegsiga dhirta asaliga ah.

Gaaridda biyo-xigeenka oo lagaga gudbi karo tobograafiyad dhaadheer ee leh dagaandag tartiib tartiib ah iyo wiish cusub



Jaran-jarooyinka Salish oo tagaya biyo-xigeenka oo loogu talagalay in ay dadku isugu yimaadaan



Goobo la ilaaliyo oo leh cunto iyo cabbitaan iyo fadhi



Taraarax iyo waxyaabo kale oo lagu ciyaaro oo loogu talagalay qoysaska kuna yaalla goobta bannaan ee Bluff Walk



Goobta sare loo qaadey ee soo bandhigta aragtida guud ee Gacan-biyoodka Elliott Bay, Buuraha Olombik(Olympics) iyo Buurta Rainier marka laga soo eego Barta Laga Daawado Gacan-biyoodka (Bay Overlook).



## JADWALKA

Dhismaha ayaa la filayaa in uu bilowdo dabayaaqada 2022 waxayna qiyaastii qaadan doonna 2 sano in lagu dhammeeyo.

## BOOQO MAREEGTADENNA

Isdiiwaangeli si aad iimayl-ka ugu hesho wararkii ugu dambeeyay: [waterfrontseattle.org](http://waterfrontseattle.org)

## SU'AALO AMA FAALLOOYIN?

Iimayl noogu soo dir: [info@waterfrontseattle.org](mailto:info@waterfrontseattle.org)  
Naga soo wac: 206.499.8040



Seattle  
Office of the Waterfront  
and Civic Projects